**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DIB-U-DHISKA & GURIYEYNTA**

# HINDISE-SHARCIYEEDKA
## "XEERKA DHISIDDA WADDOOYINKA SOOMAALIYA"

***Waxaa Diyaariyey: Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska & Guriyeynta - 2018***

**TUSMO**

**QEYBTA KOWAAD**

**HORDHAC**

Qodobka 1aad: Magaca Xeerka....................................................................5
Qodobka 2aad: Qeexid...............................................................................5
Qodobka 3aad: Ujeeddada Xeerka..............................................................6
Qodobka 4aad: Fulinta Xeerka....................................................................6

**QEYBTA LABAAD**

**DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE WADDOOYINKA SOOMAALIYA**

Qodobka 5aad: Asaaska iyo Maamulka Hay'adda Qaran ee Waddooyinka Soomaaliya ...........................................................................................7
Qodobka 6aad: Xarumaha Hay'adda .........................................................8
Qodobka 7aad: Hawlaha Hay'adda ...............................................................8
Qodobka 8aad: Awoodaha Hay'adda ..........................................................9
Qodobka 9aad: Madaxa Hay'adda ............................................................10
Qodobka 10aad: Aqoonta iyo Xirfadda Maareeyaha Guud.......................................11
Qodobka 11aad: Shaqaalaha Hay'adda ......................................................11
Qodobka 12aad: Mushaarka iyo Gunnooyinka Hay'adda ........................................11
Qodobka 13aad: Xeer-nidaamiyeyaasha shaqaalaha ee Wasiirku soo saari karo ...11
Qodobka 14aad: Wakiilashada Hay'addu Cid kale Hawleheeda u wakiilato .........12

**QEYBTA SADDEXAAD**

**KALA-SAARIDDA WADDOOYINKA IYO DEJINTA HAL-BEEGYADA QARAN...**

Qodobka 15aad: Xilka Wasiirka.................................................................12
Qodobka 16aad: Dejinta iyo Hirgelinta Hal-beegyada ...........................................13
Qodobka 17aad: Kala-saaridda Waddooyinka..............................................13
Qodobka 18aad: Agabka Waddooyinka.........................................................14

**QEYBTA AFARAAD**

**AWOODAHA GUUD EE HAY'ADDA**

Qodobka 19aad: Helista la wareegista Dhulka...............................................14
Qodobka 20aad: Xirista iyo Weecinta Waddooyinka ...........................................14
Qodobka 21aad: BallacyadaWaddooyinka Cusub ...............................................15
Qodobka22aad: Dhulka loo Qoondeeyo Waddooyinka .........................................15
Qodobka 23aad: Bannaynta Dhulka Loo qoondeeyo Waddooyinka........................16
Qodobka 24aad: Qorsheyaasha Dhulka Loo Qoondeeyo Waddooyinka .................17
Qodobka 25aad: Bannaynta Waddooyinka ...............................................................17
Qodobka 26aad: Awoodda Dhismaha Waddooyinka Ku-meel-gaarka Ah Ee Loo Leexiyo Gaadiidka ...........................................................................................19
Qodobka 27aad: Calaamadaha Waddo-marista ee Ku-meel-gaarka ah .................19
Qodobka 28aad: Qaadista Walxaha Xannibaadda Ku Ah Waddada......................20
Qodobka 29aad: Ka-hortagga Carrada Xannibta Waddada .................................20
Qodobka 30aad: Axkaamta Dadka iyo Gaadiidka Aan Matoorka Ku Shaqayn ee Waddada Socda ...........................................................................................21

Qodobka 31aad: Awoodda Hay'adda ee God-qodista ..............................................21
Qodobka 32aad: Awoodda Fulinta Hawlo Dheeraad ah ........................................32
Qodobka 33aad: Badbaadada Dadka Waddada Socda ..........................................22
Qodobka 34aad: Agabka Waddada (Road furniture)............................................22
Qodobka 35aad: Xanibidda Waddada ...................................................................22

**QEYBTA SHANAAD**

**ARRIMAHA MAALIYADDA**

Qodobka 36aad: Asaasidda Sanduuqa Dhaqaalaha Waddooyinka ........................23
Qodobka 37aad: Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka ..................................................24
Qodobka 38aad: Barnaamijka Qaran ee Maal-gelinta Waddooyinka.....................38
Qodobka 39aad: Mas'uuliyadaha Dawladaha Xubnaha Ka Ah Federaalka ............25
Qodobka 40aad: Ilaalinta Xogta ..............................................................................26

**QEYBTA LIXAAD**

**DEMBIYADA IYO CIQAABAHA**

Qodobka 41aad: Dembiyada Is-hortaagga ..............................................................27
Qodobka 42aad: Dembiyada Lidka Ku Ah Madaxda Hay'adda..............................27
Qodobka 43aad: Ciqaab Guud .................................................................................28

**QEYBTA TODOBAAD**

**BAABI'INTA IYO QODOBADA XILLIGA KALA GUURKA**

Qodobka 44aad: Wareejinta Hawlaha ......................................................................29
Qodobka 45aad: Wareejinta Xuquuqda & Awoodaha............................................29
Qodobka 46aad: Wareejinta Hantida iyo Deymaha ................................................29
Qodobka 47aad: Wareejinta Shaqaalaha .................................................................29
Qodobka 48aad: Tilmaamaha iyo Ammarada Soo Baxay Ka Hor Dhaqan-galka Xeerka ........................................................................................................................29
Qodobka 49aad: Tallaabooyinka La Qaaday Ka Hor Dhaqan-galka Xeerka ..........30
Qodobka 50aad: Xeer-nidaamiyeyaasha ...............................................................30
Qodobka 51aad: Baabi'in .........................................................................................31
Qodobka 52aad: Dhaqan-gal ....................................................................................31
LIFAAQ.......................................................................................................................32

## QEYBTA KOWAAD
## HORDHAC

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "**Xeerka Dhisidda Waddooyinka Soomaaliya**"

### Qodobka 2aad
### Qeexid

Xeerkan gudihiisa, haddii aan ereyadan si kale oo sharci ah loo macneyn, waxay yeelanayaan erey- bixinnada soo socda;-

- **"Hay'ad"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Waddooyinka Soomaaliya ee lagu dhisay Xeerkan;
- **"Waax"** waxaa loola jeedaa Waaxda Dhismaha ee Wasaarada Hawlaha Guud, Dhib-u-dhiska & Guriyeynta, Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
- **"Kala-saarid"** waxaa loola jeedaa habka loo kala-soocayo jidadka ee Xeerkan ku xusan;
- **"Dhisme"** waxaa loola jeedaa daraaseynta, naqshaddaynta, lafa-gurka, kormeerka iyo dhismaha jidadka oo ay ku jirto la socoshada, qiimeynta, khariidad-u-sameyta, ka-hortagga iyo yareynta khatarta ka imaan karta marista jidadka;
- **"Maareeye Guud"** waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee loo magacaabo Hay'adda si waafaqsan Qodobbada Xeerkan;
- **"Waddo weyn oo laami ah"** waxaa loola jeedaa jid ama waddo hay'adda ugu talo-gashay in ay noqoto waddo laami ah oo isku xirta labo magaalo iyo wixii ka badan, taasoo hoos-tagta maamulka Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka, waana waddo ay xawli sare ku mari karaan gaadiid sida xamuul kasta oo culus;
- **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta;
- **"Wasaarad"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta;
- **"Waddooyinka Heer Qaran"** waxaa loola jeedaa waddooyinka hoos-yimaada maamulka Hay'adda, soona hoos-gelaya hannaanka kala-saaridda ee ku xusan Xeerkan;
- **"Jamhuuriyadda"** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
- **"Sanduuqa Horumarinta Waddooyinka"** waxaa loola jeedaa Sanduuqa Horumarinta Waddooyinka oo lagu dhisay si waafaqsan Xeerkan;

- **“Shabakadaha Waddooyinka”** waxaa loola jeedaa waddooyinka ku yaala Jamhuuriyadda, waxaana ka mid ah jidadka ay dhisto, ayna maamusho Hay’addu iyo hay’adaha kale ee heer Dawlad-goboleed;
- **“Waddo”** waxaa soo hoos-gelaya jidadka waaweyn ee laamiga ah iyo waddooyinka yaryar ee dadku lugeynta u adeegsado;

**Qodobka 3aad**
**Ujeeddada Xeerka**

1. Xeerkani wuxuu nidaaminayaa”Dhisidda Waddooyinka Soomaaliya”, sida hab-sami u-dhisidda waddooyinka, magacyadooda, meelaha ay maraan biyaha, buundooyinka iyo buundo-jiifyada, killiyada (kanaalada iyo dhuumaha biyaha qaada iyo marshibiyeedyada (marin-cageedyada).

2. Ujeeddooyinka Xeerkan waxaa kamid ah:
   b) Sameynta Hay’adda Qaran ee Waddooyinka Soomaaliya ;
   t) Kala-saarista jidadka;
   j) Sameynta Sanduuqa Horumarinta Waddooyinka; iyo
   x) Qeexidda mas’uuliyadaha maamulka, qorsheynta, kala-saaridda, horumarinta iyo dayactirka waddooyinka ku yaal JFS.

**Qodobka 4aad**
**Dabaqaada Xeerka**

1. Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan waddooyinka guud ee hoos-yimaada maamulka Hay’adda iyo Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka.

2. Waddooyinka ku xusan faqradda 1aad ee isla Qodobkan waxaa ka-reeban oo aan ka mid ahayn waddooyinka hoos-yimaada Maamulka Dekadaha iyo Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada.

**Comment [b1]:** Qodobkaan, wuxuu u baahan yahay in Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Gureyntu caddeyso sababta Wadooyinka Dekadaha iyo Diyaaradaha ama Wadooyinka hoosyimaada Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada looga reebay dabaqaadda Xeerkan?

## QEYBTA LABAAD
## DHISMAHA HAY’ADDA QARAN EE WADDOOYINKA SOOMAALIYA

**Qodobka 5aad**
**Asaaska iyo Maamulka Hay’adda Qaran ee Waddooyinka**

1. Hay’adda Qaranka ee Waddooyinka, waa Hay’ad leh is-maamul u gaar ah, isla markaana hoos-timaada Wasaaradda.

2. Hay’addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuneed, waxayna awood u leedahay in ay magaceeda:
   b) Wax ku dacweyn karto ama lagu dacweyn karo;
   t) Wax ku gadan karto, wax isaga iibin karto, wax ku kiraysan karto, kula soo wareegi karto ama isaga wareejin karto hanti guurto ama ma-guurto ah;
   j) Ku amaahato lacag ama hanti kale kaddib oggolaanshaha Wasiirka iyo ciddii

kale ee ay khusayso;

x) Kula gasho heshiis qof kasta ama hay'ad walba oo bixin karta adeeg markaas ay bixin lahayd hay'addu;

k. Ku magacawdo, ku shaqaaleysiiso ama ku rukhsayso qof kasta oo hay'adda u shaqeeya si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka;

d- Ku uruuriso, kuna jaan-goyso khidmadaha laga qaadayo gaadiidka iyo wixii khidmad kale ah ee ka dhasha adeegyo hay'addu qabatay ama ay fududeysay;

r) Ku sameyso waaxyo ama laamo ka farcama Hay'adda, haddii hay'addu oggolaansho uga hesho Wasiirka;

s) Kula gasho heshiis dawlad, shirkad ama hay'ad kasta oo kale haddii markaasi Maareeyaha Guud uu aaminsan yahay in heshiiska noocaas ah uu xoojinayo adeeg ama hawl hay'adda bixin lahayd, kaddib oggolaanshaha Wasiirka;

sh) Ku fuliso, kuna qabato hawl kasta oo ay hay'adda ku xaqiijinaysa in ay uga soo dhalaasho hawlaha loo idmaday; iyo

dh) Fulinta wixii hawlo ah ee soo hoos-gelaya shaqooyinka hay'adda eek u xusan Xeerkan, soona hoos gelaya hawlaha ay qabato hay'ad kasta ee dawladeed

3. Hay'addu waa in aysan iska iibin, kirayn ama wareejin dhul ama dhisme ay Dawladda Federaalka ku wareejisay.

4. Hay'adda waxaa madax u ah, uguna sarreeya Maareeyaha Guud oo lagu soo magacaabayo si waafaqsan Xeerkan.

## Qodobka 6aad
## Xarunta Hay'adda

Xarunta Hay'adda waxay noqonaysaa magaalo-madaxda dalka ee Muqdisho, iyadoo aan wax loo dhimayn Faqradaha hore ee qodobka 5aad ee Xeerkan, ujeedaduna tahay maamul-daadejinta hawlaha Hay'adda, Hay'addu waxay u isticmaali kartaa xafiisyada hay'adaha waddooyinka dawlad-goboleedyada xafiisyo iyada farac ka ah ama matala si waafaqsan wada-shaqaynta hay'adaha heer federal iyo heer Dawlad-goboleed ee ku xusan Dastuurka JFS.

## Qodobka 7aad
## Hawlaha Hay'adda

Hay'addu waxay mas'uul ka tahay:

b) Naqshadeynta, horumarinta, dhismaha, dayactirka iyo dib-u-dhiska waddooyinka dalka kuwaas oo ay kamid yihiin buundooyinka, kanaalada (culverts), tubooyinka la geliyo buundooyinka jidka ee biyaha saara (siphons), buundo-jiifka (Irish crossings) iyo hab kasta oo lagama-maarmaan u ah shabakadaha waddooyinka ee dalka isku-xira (road network structures);

t) Qorsheynta, horumarinta hal-beegyada, xeerarka iyo shuruudaha laga doonayo waddooyinka heer Qaran iyo heer Dawlad-goboleed, oo ay ku jiraan dhisidda, sare-u-qaadista iyo dayactirka jidadka ay maamusho hay'adda

haddii markaas ay toos u dhisayso Hay'addu ama qandaraasle dhisayo;

j) Kormeerista waddooyinka Qaranka sida dhulka loo qoondeeyey waddooyinka iyo sida looga faa'iidaysan karo dhinacyada waddooyinka;

x) Meel-marinta siyaasadaha waddooyinka ee la xiriira waddooyinka heer Qaran;

k) Xaqiijinta u hoggaansanka Xeerarka iyo hab-raacyada lagu xaddidayo culayska xamuulka gaadiidka ee ku xusan xeerka waddo-marista iyo Xeerkan;

d- Xaqiijinta tayada shaqada laga qabto jidadka si waafaqsan hal-beegyada iyo xeerarka ay dejiso Hay'adda ee laga ansixiyo Golaha Wasiirada;

r. kormeerka iyo maareynta habka waddo-marista iyo badbaadada waddooyinka iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada iyo Waaxda Booliska ee qaabilsan;

s. Ururinta dhammaan xogta lagama-maarmaanka u ah adeegsiga iyo qorhse-u-dejinta waddooyinka Qaran ee ku xusan Xeerkan;

sh) Kormeerka iyo qiimeynta adeegsiga jidadka ee heer Qaran;

dh) Qorsheynta, horumarinta iyo dayactirka jidadka heer Qaran;

c) Kala-talinta Wasiirka arrimaha la xiriira jidadka heer Qaran;

q) Diyaarinta barnaamijyada shaqada laga qabanayo waddooyinka heer Qaran ;

k- La-xiriirka iyo kala-talinta hay'adaha kale ee heer Dawlad-goboleed dejinta qorsheyaashooda iyo fulinta hawlahooda dhisme iyo dayactir ee ku aaddan waddooyinka; iyo

l) Fulinta wixii hawlo kale ah ee la xiriira meel-marinta Xeerkan sida uu amro Wasiirka.

## Qodobka 8aad
## Awoodaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay awood u leedahay in ay:

b) Dayactirto, ka shaqayso, horumariso, ayna maamusho shabakadaha waddooyinka dalka isku xira ee ay ku shaqo leedahay;

t) Dhisto jidad cusub iyadoo toos hawsha dhismaha u fulinaysa ama qandaraasle u xilsaaraysa; iyo

j) Cabbirto, ayna qiimeyso culayska, ballaca iyo awoodda gaadiidka isticmaalaya jidadka, ayna qaaddo tallaaabooyin lagu xaqiijinayo u hoggaansanka iyo raacidda xeerarka xakamaynta culayska gaadiidka, xeerka wadda marista iyo xeer kale oo kasta oo xiriir la leh xeerkan.

2. Iyadoo aan wax loo dhimayn tudcaha guud ee ku xusan faqradda hore ee Qodobkan, hay'addu waxay awood u leedahay:

b) In ay dhisto jidadka, buundooyinka, qaababka ama hababka bullaacadaha, kanaalada webiyada iyo qaab kasta oo soo gelaya hawlaha iyo ujeedka hay'adda loo asaasay;

t) In ay habka ugu wanaagsan ugu shaqayso agabka iyo qalabka loogu talagalay waddooyinka dadweynaha;

j) In ay fuliso hawl kasta oo lagama maar-maan u ah meel-marinta ujeedka loo

asaasay Hay'adda, ayna ku matasho Dawladda Federalka wixii hawl ah ee la isku afgarto in ay fuliso;

x) In ay iyadoo oggolaansho ka haysata Wasiirka, khidmado iyo ujrooyin ku soo rogto ama ka qaado cid kasta oo adeegsanaysa adeegyadeeda iyo agabkeeda;

k) In ay hesho dhul u sahla gudashada iyo xaqiijinta ujeedka loo asaasay Hay'adda;

d- In ay gasho, ayna kormeerto dhul kasta oo Hay'addu shaqo uga baahato;

r. In ay gasho dhul si loo baajiyo shil dhaca;

s. In ay gasho dhul si ay u bedesho tuuboooyin ku jiray;

sh) In ay ka saarto tuubooyin dhulka kaydka u ah waddooyinka; iyo

dh) In ay biyaha ka saarto meel kasta oo si dabiici ah biyaha u fariistaan si waafaqsan xeerka jira; iyo in ay mag-dhaw siiso qof kasta oo wax ku noqda

## Qodobka 9aad
## Maareeyaha Guud ee Hay'adda

1. Maareeyaha Guud ee Hay'adda, waxaa magacaabaya Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, kaddib soo-jeedinta Wasiirka.

2. Marka si rasmi ah loo magacaabo Maareeyaha Guud wuxuu dhisayaa qaab-dhismeedka maamul ee Hay'adda isagoo qeexaya mas'uuliyadda xubin walba oo Hay'adda kamid ah.

3. Maareeyaha Guud wuxuu xilka haynayaa muddo 3 (saddex) sano ah, waxaana xilka loo kor-dhin karaa hal mar oo kaliya.

**Comment [b2]:** Waxaa noo muuqata in waqtigaan yaryahay loona baahan yahay in ugu yaraan 4 sano la gaarsiiyo. Arrintaas Wasaaradda Hawlaha Guud il gaar ah haku fiiriso.

4. Waxaa xilka laga qaadayaa Maareeyaha Guud haddii:
   b) Uu xilkiisa u gudan waayo xanuun jireed ama maskaxeed awgeed;
   t) Uu ku xad-gudbo Dastuurka dalka ama xeer kale oo Qaran;
   j) Maxkamad ku xukunto fal-dembiyeed ciqaabtiisu ka badan tahay 3 (saddex) Sano; ama
   x) Uu noqdo mid lagu dhawaaaqo cayrnimadiisa, haddii uu yahay qandaraasle;

**Comment [b3]:** Cayrnimadiisa waa fahmi weynay ujaadada laga leeyahay ereygaas. Wasaaradda Hawlaha Guud hala fakaro si qoto dheer.

5. Xafiiska Mareeyaha Guud wuxuu noqonayaa mid bannaan haddii Mareeyaha Guud:
   b) Uu is-casilo isagoo qoraal ku ogeysiinaya Wasiirka; ama
   t) Uu geeriyoodo.

## Qodobka 10aad
## Aqoonta iyo Xirfadda Maareeyaha Guud

Qof kasta wuxuu u qalmaa in uu qabto jagada Maareeyaha Guud, haddii qofkaasi:

b) Uu haysto shahaadada kowaad ee cilmiga injineeriyada iyo toban sano oo khibrad xirfadeed ah oo la xiriira maamulka iyo farsamada dhismaha waddooyinka; ama

t) Uu haysto shahaadada labaad ee cilmiga injineeriyada, una raacdo shan sano oo khibrad xirfadeed ah; iyo
j) Uu leeyahay hufnaan iyo sumcad lagu aamini karo.

**Qodobka 11aad**
**Shaqaalaha Hay'adda**

1. Maareeyaha Guud wuxuu ku qaadanayaa shaqaalaha iyo saraakiisha kale ee Hay'adda hab tartan furan ah oo waafaqsan hannaanka shaqa qorista ee u degsan Shaqaaaha Rayidka ah.

2. Saraakiisha iyo shaqaalaha lagu soo magacaabo habka ku xusan faqradda hore ee Qodobkan waxay shaqada xafiiska loo idmaday ku gudanayaan si waafaqsan qeexista shaqo ee lagu magacaabay ama lagu qaatay iyo Xeerkan.

**Qodobka 12aad**
**Mushaarka Shaqaalaha**

Hay'addu waxay mushaar iyo gunno siinaysaa shaqaaleheeda iyadoo raacaysa Xeerka iyo habka mushaarsiinta u degsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Soomaaliya.

**Qodobka 13aad**
**Xeer-nidaamiyeyaasha shaqaalaha**

1. Iyadoo la raacayo qodobadda ku xusan xeerkan, Wasiirka wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaal, hab-raacyo iyo dikreetooyin guud ahaan qeexaya shuruudaha shaqo ee shaqaalaha Hay'adda.

2. Iyadoo aan wax loo dhimayn micnaha guud ee faqradda hore ee Qodobkan, shuruudaha shaqo ee laga doonayo shaqaalaha Hay'adda waa in lagu xusaa heshiiska shaqo ee lala gelayo shaqaalaha.

**Qodobka 14aad**
**Wakiilashada Hay'adda**

Hay'addu iyadoo la tashanaysa Wasiirka, waxay u wakiilan kartaa hawlaha ay awoodda u leedahay ee la xiriira waddooyinka cid kale oo ka tirsan Dawlad-goboleedyada ama Hay'ado madax-bannaan oo qandaraasleyaal ah.

## QEYBTA SADDEXAAD
## KALA-SAARIDDA WADDOOYINKA IYO DEJINTA HAL-BEEGYADA QARAN EE WADDOOYINKA

**Qodobka 15aad**
**Xilka & Awoodaha Wasiirka**

1. Iyadoo aan loola jeedin xaddidaad awoodaha Wasiirka, Wasiirku wuxuu:
   b) Soo saarayaa hab-raacyada horumarinta waddooyinka JFS;

t) Dejinayaa hal-beegyo la xiriira waddooyinka iyo buundooyinka;
j) Kala saarayaa waddooyinka;
x) Ku dhawaaqayaa dhulka loo qoondeeyey waddooyinka si waafaqsan qodobbada xeerkan;
k) Fulinayaa wixii hawl kale ah ee gacan ka geysan karta horumarinta, dayactirka iyo maareynta waddooyinka heer Qaran; iyo
d- Isagoo la tashanaya Hay'adda, wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal dalka oo dhan ka dhaqan-gala oo lagu xakameeyo culayska gaadiidka isaga-goosha dalka si loo ilaaliyo buundooyinka iyo waddooyinka laamiga ah.

2. Wasiirka wuxuu sidoo kale, marka xeerkani dhaqan-galo, abuurayaa gole noqda madal wada-tashi oo ka talo-bixiya arrimaha la xiriira waddooyinka isku xira JFS.

3. Iyadoo aan wax loo dhimayn macnaha guud ee faqradaha hore ee Qodobkan iyo guud ahaan Qodobbada Xeerkan, mas'uuliyada Madasha lagu dhisay faqradda 2aad ee Qodobkan waxaa kamid ah:
   b) Dejinta siyaasadda lagu hagayo arrimaha waddooyinka;
   t) Kala-talinta Maareeyaha Guud arrimaha la xiriira fulinta siyaasadda iyo xeerkan;
   j) Kormeerka iyo qiimeynta hawlaha Hay'adda; iyo
   x) Fulinta wixii hawl kale ah oo muhiim ah ama Wasiirka dalbado.

4. Wasiirka wuxuu ka soo xulayaa xubnaha kamid noqonaya Madasha hay'adaha ay khuseyso ee heer Federal iyo heer Dawlad-goboleed.

## Qodobka 16aad
## Dejinta iyo Hirgelinta Hal-beegyada

1. Wasiirka wuxuu soo saarayaa hal-beegyada lagu maamulayo waddooyinka dalka iyo xeer-nidaaminta waddooyinka, waxaana hal-beegyada kamid ah kuwa lagu maamulayo ama hagaya dhismaha iyo dayactirka waddooyinka heer Dawlad-goboleed.

2. Wasiirka wuxuu marayaa hannaan wada-tashi oo uu la yeesho dadka adeegsada waddooyinka, xirfadlayda iyo guud ahaan dadweynaha marka ay timaado diyaarinta, dib-u-eegista iyo wax-ka-beddelista hal-beegyada Qaran ee waddooyinka.

3. Wasiirka wuxuu ku daabacayaa hal-beegyada Qaran ee waddooyinka Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

4. Dawladaha hoose iyo Dawlad-goboleedyadu waxay u hoggaansamayaan oo raacayaan hal-beegyada Qaran ee waddooyinka ee Wasiirka soo saaro sida ku xusan xeerkan.

**Qodobka 17aad**
**Kala-saaridda Waddooyinka**

1. Dhammaan waddooyinka ku yaalla Jamhuuriyadda waxaa loo kala saarayaa sida ku xusan Qeybaha kowaad iyo labaad ee lifaaqa xeerka.

2. Maareynta nooc walba ee waddooyin ah oo Jamhuuriyadda ku yaal waxaa loo raacayaa sida ku xusan Qeybta saddexaad ee lifaaqa xeerkan.

3. Iaydoo aan waxba loo dhimayn kala-saaridda ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan, Wasiirku isagoo la tashanaya Hay'adda, wuxuu soo saaro xeer-nidaamiye waaafaqsan xeerkan oo siinaya tiro iyo magac lagu garto jidadka ku yaalla Jamhuuriyadda.

4. Inta xeer-nidaamiyaha ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan laga soo saarayo, dhammaan kala-saarista iyo tirada loo yaqaan jidadka hadda jira ayaa sii jiraya ama lagu sii shaqaynayaa xitaa haddii xeerka dhaqan-galo.

**Qodobka 18aad**
**Xogta Diiwaanka Waddooyinka**

Hay'addu waxay haynaysaa, keydinaysaa, ayna cusboonaysiinaysaa xogta diiwaanka waddooyinka ay maamusho, waana in diiwaanku bixiyaa faahfaahin ku saabsan waddooyinka oo ay ku jirto kala-saarista iyo magaca loo yaqaan waddo kasta si waafaqsan habka kala-saarista ee Wasiirka soo saaro.

**QEYBTA SHANAAD**
**AWOODAHA GUUD EE HAY'ADDA**

**Qodobka 19aad**
**Helista iyo La-wereegidda Dhulka**

1. Haddii Hay'addu u baahato dhul ay ujeeddooyinkeeda ku fuliso, Maareeyaha Guud wuxuu codsi in dhul la siiyo ah u gudbinayaa Wasiirka mas'uulka ka ah arrimaha dhulka, waxaana arrinta dhul-helista xeerinaya hadba xeerka dhulka ee jira, waxaase shardi ah in Maareeyaha Guud isagoo la tashanaya cidda ay khusayso, uu mag-dhaw siiyo cid kasta oo dhulkeeda ama hantideeda Hay'adda lagu wareejiyey.

2. Tilmaamaha ku xusan faqradda (1) ee isla Qodobkan waxaa laga soo reebayaa oo aan ka mid ahayn dhulka qabuuraha ama masaajiddu ku fadhiyaan.

**Qodobka20aad**
**Xirista iyo Weecinta Waddooyinka**

1. Maareeyaha Guud wuxuu xiri karaa, weecin karaa waddo walba ama qeyb kamid ah waddada haddii uu u arko in tallaabadaas ay ku jirto danta guud.

2. Mareeyaha Guud:
   b) Si looga hortago waxyello soo gaarta marin-lugeedka (marshabiyeediska) waddooyinka (road pavements) dhinacyada waddada (shoulders), buundooyinka iyo qaababka bullaacadaha, wuxuu xiri karaa ama weecin kara jid walba ama qeyb jidka kamid ah; ama
   t) Wuxuu xakamayn karaa cabirka iyo culayska gawaarida adeegsanaysa waddada haddii uu u arko mid lagama-maarmaan u ah sababo la xiriira cimmilada ama arrimo kale awgeed.

3. Maareeyaha Guud wuxuu u idman karaa ama ku wareejin karaa awoodihiisa ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan shaqaale farsamo oo idman ama sarkaal ka tirsan hay'adda.

4. Wasiirka wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiyeyaal la xiriira duruufaha iyo xaaladaha keeni kara in waddooyinka dadweynaha la xiro si waafaqsan qodobkan.

**Qodobka 21aad**
**Ballaca Waddooyinka Cusub**

Ballaca waddooyinka magaalooyinka iyo kuwa faraca ah ee heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleed wuxuu noqonayaa mid dhinac walba ka ah 25 mitir marka dhexda laga cabiro, halka ballaca waddooyinka heerka kowaad iyo heerka labaad uu dhinac walba ka noqonayo 50 mitir.

**Qodobka 22aad**
**Dhulka Loo Qoondeeyo Waddooyinka**

1. Wasiirku wuxuu ku dhawaaqi karaa dhulka loo qoondeeyey waddooyinka marka uu codsi arrintaas ku saabsan ka helo Hay'adda.

2. Qofna waa in uusan ku xad-gudbin, dhisme ka sameyn ama uusan dalag ku beerin dhulka loo qoondeeyey waddooyinka.

3. Dhulka loo qoondeeyey waddada ee ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan, waa in uusan ka badnaan 50 (konton) mitir waddooyinka heerka kowaad iyo heerka labaad marka dhexda waddadaas laga cabiro ama uusan ka badan 25 (labaatan iyo shan) mitir marka laga hadlayo waddo magaalo ama waddo farac ah.

4. Ka hor inta aan lagu dhawaaqin dhulka loo qoondeeyey waddooyinka, Wasiirka wuxuu hubinayaa in dadka haysta ama degan dhulka seeraha waddada ah:
   b) La siiyey ogeysiis ku filan oo laba bilood gaarsiisan kaas oo si furan loola wadaagay dadweynaha;
   t) Lagu waaniyey ama lagula taliyey in mudada labada bilood ah iyo wixii ka dambeeya, loo bandhigayo xafiiska dawladda ee arrinta khusayso qorshayaasha muujinaya xuduudaha aagga waddada kaydka looga dhigay, waxaana la filayaa in markaas qoryshayaasha la soo jeediyey ay wataan tirada iyo caalamadaha muujinaya meesha goobtu kaga taal dhulka; iyo
   j) La siiyey fursad ay dadkaasi uga dacwoodaan ama xaaladooda uga hadlaan marka waqtigii ogeysiiska dhammaaday.

5. Hay'addu waxay wax-ka-beddel ama dib-u-habayn ku sameyn kartaa goobta loo qoondeeyey waddada iyadoo ka jawaabaysa cabashada ku xusan faqradda hore, iyadoo lagu wargelinayo dhinacyada cabashada wax-ka-bedelka ama dib-u-habeynta la sameeyey, loona sheegayo dhinacyada inay cabasho ama dood qoraal ah soo gudbin karaan oo ku saabsan sida ay u arkaan, dib-u-habaynta muddo 30 (soddon) maalmood ah.

6. Ka hor intaan lagu dhawaaqin dhulka loo qoondeeyey waddada, Wasiirka waa in uu tixgeliyaa cabashada ku xusan faqradda hore iyo arrin kale oo kasta oo uu is-leeyahay waa mid u baahan in tixgelin la siiyo.

7. Haddii Wasiirka go'aansado in uusan ku dhawaaqin dhul loo qoondeeyo waddada sida ku xusan qodobkan, Maareeyaha Guud wuxuu diyaarin karaa hindise cusub oo uu u gudbiyo Wasiirka.

**Qodobka 23aad**
**Banneynta Dhulka Loo Qoondeeyey Waddo**

1. Dhulka lagu dhawaaqo in loo qoondeeyey waddo sida ku xusan xeerkan, waa in loo isticmaalaa oo keliya horumarinta waddada iyo wixii kale oo hawlo ah ee la xiriira waddada, waana in aan qofna uga taagin si ku-meel-gaar ah iyo si joogto ah toona wax qaab ama aalad ah ama ku beerin geed ama dalag joogto ah isagoo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Maareeyaha Guud kaasoo oggolaanshaha ku xiri kara shuruudda ku habboon.

2. Maareeyaha Guud waa in uusan sabab-la'aan ku diidin codsiga ah in loo isticmaalo dhulka waddada loo qoondeeyey adeegyada bulshada sida in laga taago biraha ama kayballada korontada.

3. Haddii cidda gacanta ku haysa adeegga bulsho aysan ku qancin go'aanka Maareeyaha oo uu u diido siinta oggolaanshaha ama shuruudaha uu ku xiray

oggolaanshaha ay noqdaan kuwa aan loo qiil-dayi karin, cidda gacanta ku haysa hawsha adeega bulsho waxay rafcaan u qaadan karaan Wasiirka.

4. Waxaa laga soo qaadayaa go'aanka Wasiirka ee ku xusan faqradda (3) ee Qodobkan mid kama-dambays ah oo aan rafcaan dambe lahayn.

5. Haddii Hay'adda u baahato in ay dib u hanato qeyb kamid ah ah dhulka loo qoondeeyey waddada ee uu haystay qof aan ahayn qeybaha adeegga bulshada ee loo fasaxay sida ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan, Hay'adda waxay qofkaas siinaysaa ogeysiis ay kaga dalbanayso in uu ku banneeyo dhulka muddo meel-mar ah (afar toddobaad), waxayna Hay'adda kula noqonaysaa dhulkaas iyadoo aan wax mag-dhaw ah bixin.

6. Qofka isagu haysta oggolaanshaha isticmaalka dhulka u seeraysan waddada sida ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan, kaasoo hawlihiisa ay waxyeello gaarsiiyaan waddada ama agabka waddada waa in uu dib-u hagaajiyaa wixii uu waxyeello u geystay si waafaqsan shuruudaha iyo hal-beegyada farsamo ee waddooyinka u yaal.

7. Qofka ku guul-daraysta in uu u hoggaansamo shuruudaha ku xusan qodobkan wuxuu gelayaa dembi ganaaxiisu u dhexeeyo lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$500 – 5,000" (Shan boqol ilaa Shan Kun Doolarka Maraykanka) iyo wixii kharash ah ee Hay'addu ku gasho dib-u-hagaajinta waxyeellada uu geystay.

## Qodobka 24[aad]
## Qorshe-u-sameynta Dhulka Loo Qoondeeyey Waddada

1. Hay'addu waxay diyaarinaysaa qorsheyaal ku aaddan xuduudaha dhulka loo qoondeeyey waddooyinka dadweynaha, waxayna qorshahaas wax ka beddeli kartaa markii loo baahdo.

2. Qorsheyaasha ku xusan faqradda hore waa in la dhigaa xafiiska Degmada u qaabilsan Diiwaan-gelinta Dhulka.

3. Marka la cabirayo xuduudaha dhulka loo qoondeeyey waddada, waxaa la adeegsan karaa hannaanka lagu ogaado halka goob kasta ku taal (global positioning systems) oo ay wehliyaan lambarka ama tirada lagu garto goobta ay dhulka kaga taal (coordinates).

## Qodobka 25[aad]
## Banneynta Waddada

1. Hay'adda ama qof kasta oo oggolaansho ka haysta Hay'adda wuxuu geli karaa dhul kasta isaga oo ujeedkiisu yahay:
   b) In uu qaato agab looga baahan yahay shaqooyinka waddada, waxaana kamid

ah biyaha, haddii aan markaas laga qaadan biyo-xireen gacan-ku-samays ah, ceel, ama ceel riig-qodaal ah oo laga haysto oggolaanshaha qofka milkilaha ah; ama

t) Diyaarinta xero ama kaam shaqada loo isticmaalo furista waddo la mariyo, agabka lagu dhisayo waddada, mana jiro mag-dhaw ka dhalanaya arrintaas oo aan ka ahayn sida ku xusan qodobkan.

2. Ka hor inta aan la qaadin tallaabooyinka ku xusan faqradda hore ee Qodobkan, Hay'addu waa in ay la tashataa milkilaha dhulka iyadoo aqbalaysa haddii markaas uu ku yabooho dhigan habboon oo looga maarmo gelista dhulkiisa.

3. Hay'adda waa in aysan qofna mag-dhaw ka siin hawlaha la xiriira agabka loo qaadayo ama loo isticmaalayo dhulka waddada loo qoondeeyey.

4. Hay'addu waa in aysan yeelan wixii agab ah ee milkilaha kharash ama hawl ka gashay ama ah guri ama ceel-biyood ama agab kale, haddii aan markaas oggolaansho laga haysan milkilaha ama mag-dhaw lagu wada heshiiyey aanu jirin.

5. Marka la dhisayo jidad la maro sida kuwa loo maro godadka dhagaxa ama dhoobada laga jabsado, Hay'adda waxay xaq u leedahay in ay wado ka furato oodda ama teedka, waxaase shardi ah in ay sidii hore ku celiso marka shaqado dhammaato.

6. Hay'adda waa in ay xaqiijisaa in aan dhibi ka imaan godadka ay dhagaxa ama dhoobada kala baxayso iyo wixii qodaal ah oo ay sameyso guud ahaan.

7. Haddii hawlaha Ha'adda ay ka dhashaan khasaare naf ama hanti ah, waa in Hay'adda ay siisaa cidii waxyeelladu soo gaartay mag-dhawga loo baahan yahay si meel-mar ah.

## Qodobka 26aad
## Awoodda Hay'addu U Leedahay Dhisidda Waddooyin Gaadiidka Loogu Leexiyo Si Ku-meel-gaar ah

1. Hay'addu marka ay dhisayso ama dayactirayso waddooyin dadweyne oo ay u xilsaaran tahay, waxay iyadoo siinaysa ogeysiis dadka dhulka haysta ee ay khusayso, dhisi kartaa waddooyin si ku-meel-gaar ah gaadiidka loogu leexiyo si ay u maraaan (inta hawsha dhismaha waddada socoto), haddii dhulka gaadiidka loo leexinayo uusan ahayn mid ku fadhiya dhismeyaal, beero ama hawlo kale oo horumarineed ama uusan ahayn dhul markaas falis ama tabcid ku socoto ama dhul dhisme markaas u diyaarsan, mana jirto wax mag-dhaw ah oo ay Hay'addu bixinayso.

2. Awoodaha Hay'adda lagu siiyey faqradda hore ee Qodobkan waxaa soo hoos geli kara dhulka ku fadhiya dhismeyaasha, beeraha ama hawlo horumarineed laga wado ama ah dhul la tabcayo ama aag la dhisayo ku yaal, haddii markaas oggolaansho laga helo dadka leh dhulka, laguna wada heshiiyo mag-dhaw.

3. Haddii Hay'addu ka dhisto waddo-leexinta dhul loo qoondeeyey waddo ama dano kale, Hay'addu waa in ay marka leexintu dhammaato ay ku celisaa sidii hore oo ay ku qanacdaa Wasaaraddii mas'uulka ka ahayd dhulka leexinta loo adeegsaday, iyadoo laga digtoonaanayo nabaad-guur ku yimaada carrada.

## Qodobka 27aad
## Calaamado Wado-maris oo Ku-meel-gaar ah

1. Sarkaal boolis oo kasta ama qof kasta oo isagu ku shaqeeya amarka Hay'ada ama amarka hay'adaha booliska wuxuu dhigi karaa calaamado waddo-maris (traffic signs) wado walba si ay ugu digto ama u hagto gaadiidka, una xakamayso socodka baabuurta haddii markaas uu dhaco shil aan la malaynayn ama dan kale oo lagama maarmaan ah.

2. Hay'adda ama cid kasta oo kale oo Hay'ada amar ka haysata, oo ka shaqeeya hawlaha dayactirka ama dhismaha waddooyinka wuxuu taagayaa/rakibayaa calaamadaha waddo-marista gaadiidka si ay u noqdaan kuwa digniin bixiya, xakameeyana socodka baabuurta.

3. Caalaamadaha waddo-marista ee la taagay si waafaqsan qodobkan waxaa meesha laga fujinayaa isla marka hawlihii markii horeba dartood loo taagay ay soo dhammaadaan.

## Qodobka 28aad
## Qaadista Walxaha Xannibaadda ku ah Waddada

1. Si Meesha looga saaro xannibaadda waddooyinka, Hay'addu waxay ogeysiis qoraal ah siinaysaa qof kasta oo carqaladaynaya ama xannibaad ku haya waddo kasta oo dadweyne.

2. Haddii qofka la siiyey ogeysiinta ku xusan faqradda hore ee Qodobkan ka baaqsado u hoggaansanka ogeysiiska la siiyey, Hay'addu waxay sabab u noqon kartaa qaadista xayiraadda iyo jid-gooyada.

3. Si loo fuliyo ujeedka ku xusan faqradaha hore ee Qodobkan, Hay'addu waxay geli kartaa guri walba, beer walba iyo dhisme kasta oo kale si meesha looga qaado xayiraadaha ama jidgooyada, waxaana kharashka ku baxa wareejinta jidgooyada laga qaadayaa qofka ka baaqsaday ama diiday in uu ka wareejiyo waddada wax yaalaha jidgooyada ama xayiraadda ku ah.

**Qodobka 29aad**
**Ka-hortagga Carrada Waddada Xannibta**

1. Qofka leh dhulka ku dheggan ama deriska la ah waddada dadweynaha waa in uu ka ilaaliyaa ciidda ka soo baxda dhulkiisa in loo xaaqo dhanka waddada.

2. Haddii qof ka-baaqsado in uu u hoggaansamo waajibka ku xusan faqradda hore ee Qodobkan, Hay'adda waa in ay siisaa ogeysiis qoraal ah oo ay ugu digayso, ugana dalbanayso in uu hoggaansamo.

3. Haddii qofka ogeysiiska digniinta la siiyey uu ka baaqsado in uu u hoggaansamo ogeysiiska ama digniiinta, Hay'adda ayaa shaqada ciid-ka-wareejinta jidka qabanaysa, waxayna xaq u leedahay in ay kharashka hawsha ku baxa ka qaado milkilaha dhulka.

**Qodobka 30aad**
**Qodobbada Khuseeya Dadka Waddada Socda iyo Gaadiidka aan Matoorka ku Shaqeyn**

Si loo xaqiijiyo badbaadada, loona fududeeyo socodka dadka waddada ku lugaynaya iyo gaadiidka kale ee aan matoorka ku shaqeyn ee waddada adeegsada, Hay'addu waa in ay, haddii ay lagama-maar-maan noqoto, astaysaa oo calaamadaysaa meelo gaar ah oo dadka iyo gaadiidka aan matoorka lahayn ay maraan.

**Qodobka 31aad**
**Awoodda Hay'adda ee Godad-qodista**

1. Markii loo arko in ay lagama-maarmaan u tahay biyo-saarka, horumarinta, dayactrika ama dhismaha waddada dadweynaha, Hay'addu waxay ka sameyn kartaa dhulka deriska la ah ama ku dhegan waddada dadweynaha godad, majarooro, tuubooyin biyaha saara ama gudbiya, kannaalo, godad dhulka hoostiisa mara ama buundooyin.

2. Iyadoo oo la fulinayo tilmaamaha ku xusan faqradda hore ee Qodobkan, haddana tubada biyaha qaadaysa, godka dhulka hoostiisa la marinayo ama kannaalku waa in aan lagu furin ama lagu butaacin biyaha ka yimaada dhul ama hanti si gaar ah loo leeyahay kaas oo waxyeello ama nabaad-guur ku keeni kara hantida.

**Qodobka 32aad**
**Awoodda Fulinta Hawlo Dheeraad ah**

1. Hay'addu waxay awood u leedahay in ay dhisto, dayactirto, waxna ka bedesho shaqooyinka laga qabanayo waddooyinka sida in ay:
   b) kala saarto qeybta loo isticmaalo waddo-marista ee hal jiho u socota iyo qeybta kale ee waddo-marista ee jihada kale u jeeda;
   t) Kala hagto isu-socodka gaadiidka ee meelaha is-goysyada ah; ama

j) Astayso/calaamadayso goobaha la miciinsado si loo ilaaliyo dadka waddada socda ee doonaya in ay gooyaan ama tallaabaan waddada.

2. Awoodda lagu siiyey Hay'ada faqradda hore ee Qodobkan, waxaa soo gelaysa awoodda ay Hay'adda ugu sameyn karto nal ama iftiin hawl kasta oo ay ku jirto danta badbaadada dadka.

**Qodobka 33aad**
**Badbaadada Dadka Socda Waddooyinka**

Hay'addu waxay xaqiijinaysaa badbaadada dadka adeegsada waddooyinka marka lagu jiro naqshad-dejinta, dhismaha, dayactirka iyo ka-shaqaysiinta waddooyinka dadweynaha iyadoo sameynaysa calaamadaha jidadka, goobaha ay marayaan dadka jidka socda iyo wixii kale ee agab ah.

**Qodobka 34aad**
**Agabka Waddooyinka**

1. Qof kasta, oo si kas iyo bareer ah u dhaafa, waxyeello u geysta, fujiya ama qariya wax kasta oo kamid ah agabka waddada wuxuu mutaysanayaa, marka la xukumo, ganaax u dhexeeya Shillin Soomaali u dhigma "US$100-1000 Doollar", haddii aan markaas falkiisu sababin dhib xoog leh oo markaas lagu qaado qodobka 332aad ee ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS) ee ku saabsan "isku-dayga khatar-gelinta badbaadada dadweynaha".

2. Qofka isagu si kas iyo bareer ah u waxyeelleeya, u fujiya, una qariya wax kasta oo ah agabka waddada, balse uusan falkiisu keenayn waxyeello culus sida ku xusan qodobka 324aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, waxaa lagu xukumayaa ganaax u dhexeeya lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$500-2500 Doolar".

3. Makamaddu waxay ku daraysaa ciqaabka ku xusan faqradda hore ee Qodobkan, in qofka bixiyo mag-dhaw ama soo beddelo agabka waddada ee uu waxyeelleeyey.

**Qodobka 35aad**
**Xannibidda Waddada**

1. Haddii ay jirto calaamad ka digaysa gaaari-dhigashada, wadaha gaariga waa in uusan u dhigan gaariga hab ku keeni Kara khatar, xanibaad ama xaalad jah-wareer dadka kale ee waddada isticmaalaya ku keeni karta, waana in wadaha (darawalka) gaariga uu gaariga u dhigtaa si waafaqsan hannaanka loo tilmaamay.

2. Qofkii la kulma xaalad ah in gaariga kaga xumaado waddada dhexdeeda, waa in uu qaadaa tallaabo kasta oo meel-mar ah oo uu kaga qaadayo gaariga waddada, waana in gaariga xumaaday u sameeyaa calaamad dareensiin karta dadka waddada socda in gaarigu meesha ku hallaabay/xumaaday.

3. Qofna waa in uusan ku haggaajin gaari xumaaday waddada dhexdeeda haddii aysan markaas xaalad degdeg ah ahayn, waana in aysan ka badan afar saacadood taasoo ay shardi u tahay in aysan hawsha hagaajinta gaariga ee waddada dhexdeeda noqon mid u dhacda hab dhibaato u keeni Kara waddada.

4. Iyadoo aan wax loo dhimmeyn qodobbada Xeerka Waddo-marista, qof kasta oo ku xad-gudba xukunnada qodobkan wuxuu mutaysanayaaa ganaax u dhexeeya lacag Shillin Soomaali u dhigganta "US$10-50" (toban ilaa konton) oo doolar, haddii uusan falkaasi ahayn mid dembi culus ka dhashay marka loo eego Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## QEYBTA AFARAAD
## ARRIMAHA MAALIYADDA

### Qodobka36aad
### Asaaska Sanduuqa Dhaqaalaha Waddooyinka

1. Iyadoo raacaysa hoggaanka iyo tilmaanta Wasiirka, Ha'addu waxay sameynaysaa sanduuq dhaqaale oo magiciisa yahay "Sanduuqa Dhaqaalaha Waddooyinka" kaasoo uu maamulayo sarkaalka sanduuqa madaxa ka ah.

2. Sarkaaalka maamulaya Sanduuqa Dhaqaalaha Waddooyinka waa madaxa maaliyadda ee Hay'addda.

3. Ilaha dhaqaale ee Sanduuqa Dhaqaalaha Waddooyinka waxay ka imaanayaan:
   b) Lacagta  Dawladdu u qoondeyso Hay'adda;
   t) Dakhliga ka soo xarooda khidmadaha laga qaado gaaska, shidaalka/naftada ah, saliidaha, qeybaha kala duwan iyo adeegyada kale ee dayactirka baabuurta;
   j) Canshuuraha la saaro baabuurta;
   x) Ganaaxa ay bixiyaan baabuurta ganacsiga ee uu saaran yahay xamuul ka badan xadkii loogu talo-galay;
   k) Lacagaha laga qaado rukhsadda xamuulka dheeriga ah ee culus ee la xiriira culeyska ugu sarreeya ee duuduubka miisaanka iyo qaabaynta qalabka iyo taayirrada, kaasoo loogu talo-galay in lagu daboollo hagaajinta laamiga;
   d- Khidmadaha  laga qaado gaadiidka caalamka isaga-goosha (international transit fees);
   r. Lacagaha laga qaado waddooyinka xilliga canshuur-ururinta;
   s. Deeqaha, deymaha,  hadiyadaha ama tabarucaadka ka yimaada dawlad ama meel kale ee lagu helay oggolaanshaha Wasiirka;
   sh) Lacagaha ka soo xarooda maal-gelinta ay sameyso Hay'add;
   dh) Dakhliga ka soo xarrooda hawlaha ay Hay'adda qabato  sida ku xusan Xeerkan, wixii kale oo lacag ah ee Hay'adda u soo xarooda ee ay ku gudanayso hawleheeda ku xusan Xeerkan; iyo

c) Lacag ama dakhli kasta oo kale oo hay'adda ka soo gala hawlaha ay hayso ee ku xusan Xeerkan.

4. Waa in la diiwaangaliyo dhammaan rasiidada lacag-qabashada (waraaqaha muujinaya lacagta la helay), keydka iyo lacagaha yaal laakiin deyn ahaan loo leeyahay (accruals) iyo lacagaha u soo haray Sanduuqa dhammaadka sanad-maaliyadeed kasta si loogu fuliyo ujeeddooyinka loo sameynayo Sanduuqa.

5. Faah-faahinnada ku saabsan habka loo maamulayo Sanduuqa waxaa qeexaya Xeer-nidaamiye gaar ah oo uu soo saaro wasiirku si waafaqsan Xeerkan.

## Qodobka 37aad
## Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Hay'addu waa in ay haysaa buugaag-xisaabeed dhammeystiran oo sax ah.

2. Akoonada iyo warbixinnada maaliyadeed waa in uu hanti-dhawrid ku sameeyaa Hanti-Dhawraha Guud ama ay sameeyaan Hanti-dhawreyaal uu Hanti-dhawraha Guud u xilsaaray.

3. Hanti-dhawrka wuxuu baaritaan farsamo ku sameynayaa mashaariic si gaar ah uu uga xushay mashaariicda sanadlaha ah ee la fuliyey si uu ugu kuur-galo xisaabaadka ku baxay.

## Qodobka 38aad
## Barnaamijka Maal-gelinta Waddooyinka

1. Wasiirka wuxuu gudbinayaa barnaamijka maal-gelinta waddooyinka waaweyn shantii sanoba mar, waxaana barnaamijka diyaarintiisa leh Hay'adda iyadoo oggolaansho ka haysata Wasiirka si uu uga ansixiyo Golaha Wasiirrada.

2. Barnaamijka maal-gelinta waddooyinka waaweyn ee ku xusan faqradda hore ee Qodobkan, wuxuu qeexayaa arrimaha mudnaanta la siinayo ee horumarinta iyo dayactirka waddooyinka waaweyn iyo kharashka u qorsheysan qeyb walba, waxaa kale oo uu faahfaahinayaa nooca iyo culayska maridda waddada iyo sidoo kale wixii faahfaahin kale ah ee u baahan in la qeexo iyadoo lagu darayo barnaamijkan Qorshaha Qaran ee Horumarinta Jamhuuriyadda.

3. Barnamijyada shaqo-sanadeedka ah kuwaas oo ay Hay'addu diyaariso, ayna fuliso waxaa asaas looga dhigayaa barnaamijka maal-gelinta waddooyinka waaweyn oo la waafajinayo Qorshaha Horumarinta Qaran.

4. Hay'addu waxay diyaarinaysaa, una gudbinaysaa Wasiirka miisaaniyad-sanadeed aan ka yareyn saddex sano ka hor dhammaadka sanad-maaliyadeedka, waxaana sal looga dhigayaa barnaamijka shanta sano ee maal-gelinta waddooyinka,

waxaana ku jiraya qiyaasta xisaaabta soo noqnoqnaysa, dayactirka horumarinta iyo kharashka raasumaalka ee Hay'adda ee sanad-maaliyadeedka.

5. Hay'addu waxay diyaarinaysaa oo ay u gudbinaysaa Wasiirka barnaamij qorshe-sanadeed ah, oo uu ku jiro qorshaha miisaaniyadda Qaranka, waxaana lagu saleynayaa barnaamijka shanta sano ee maal-gelinta waddooyinka ee sanad-maaliyadeedka soo socda, kaas oo ka kooban qiyaasaha xisaabeed ee hawlaha dayactirka, horumarinta iyo kharashka raasumaalka ee Hay'addu u baahan tahay sanadkaas.

## Qodobka 39aad
## Mas'uuliyadaha Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Federaalka

1. Dawlad-goboleed walba, intii ikhtisaaskeeda (awoodeeda) ah, waxay mas'uul ka tahay dhismaha iyo dayactirka waddooyinka ku yaalla Dawlad-goboleedka si waafaqsan Xeerkan.

2. Si ay u gudato mas'uuliyadeeda, Dawlad-goboleed walba waxay fulinaysaa hawlaha iyo waajibaadyada soo socda:
   b) Dhismaha, horumarinta, gacan-ku-haynta iyo dayactirka waddooyinka ku yaalla Maamulka;
   t) Maareynta dhulka loo qoondeeyey waddooyinka iyo fududeynta horumarinta dhinacyada waddooyinka ee Maamulka ku yaal;
   j) Fulinta siyaasadaha waddooyinka ee la xiriira waddooyinka heer federaal;
   x) Xaqiijinta u hoggaansanka xeerarka xaddidaya culayska xamuulka gaadiidka sida ku xusan xeerka waddo-marista iyo xeer-nidaamiyeyaasha kale;
   k) Xaqiijinta tayada waddooyinka magoolooyinka iyo waddooyinka yaryar ee dadweynaha ku xira waddooyinka waaweyn ee ay maamulaan Dawlad-goboleedyada si waafaqsan hal-beegyada Qaran ee Wasiirka soo saaro;
   d- Kormeerista maareynta waddo-marista iyo badbaadada waddooyinka ee heer Dawlad- goboleed iyagoo iskaashi la sameynaya Hay'adda;
   r. uruurinta wixii xog ah ee la xiriira isticmaalka waddooyink ee heer Dawlad-goboleed kaasoo lagama-maarmaan u ah sameynta qorshe taabbo-gal ah sida ku xusan Xeerkan;
   s. Diyaarinta barnaamijka maal-gelinta waddooyinka iyo barnaamijka hawlaha waddooyinka ee heer Dawlad-goboleed; iyo
   sh) Xiriirinta Hay'adaha kale ee waddooyinka qaabilsan ee Jamhuuriyadda ka jira si loo fuliyo qodobbada Xeerkan.

3. Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay mas'uul ka tahay, sida ku xusan xeerkan, dejinta hal-beegyada dhismaha iyo dayactirka waddooyinka magaalooyinka iyo waddooyinka faraca ah ee ay maamulayaan Dawlad-goboleedyada.

4. Si loo helo hannaan midaysan oo horumarinta waddooyinka ah, Dawlad-goboleed kasta waxay iyadoo maraysa hannaaankeeda sharci iyo maamul u fulinaysaa hawlaheeda waddooyinka si waafaqsan siyaasadda, hal-beegyada iyo hab-raacyada heer Qaran ee Wasiirka soo saaro.

### Qoodobka 40aad
### Ilaalinta Xogta

1. Xubin, sarkaal ama shaqaale u shaqeeya Hay'adda waxaa ka reebban in uu bixiyo wixii sir ah ee uu hayo ee uu ku helay shaqada uu hayo darteed, sarkaalka ama shaqaalahana wuxuu dusha u ridanayaa mas'uuliyadda arrintaa uga timaada si waafaqsan sharciga.

2. Qofka ku xad-gudba faqradda (1) ee Qodobkan, wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna mutaysanayaa ciqaab sida Xeerka dalku dhigayo.

## QEYBTA SHANAAD
## DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

### Qodobka 41aad
### Dembiyada is-hortaaga

Qof kasta oo:

b) Sameeya fal kasta oo uu ku hor-istaagayo, ama ay dhici karto in uu ku hor-istaago shaqada qalabka ama gaadiidka ay Hay'addu hawleheeda ku fulinayso, falkaasina uu yahay mid khatar gelinaya ama ay dhici karto in uu khatar geliyo nolosha qof kasta oo ku sugan goobta;

t) Xanniba waddo dadweyne, gaari ka joojiya ama ka hor-istaaga maridda waddada dadweynaha;

j) Xayawaan (xoolo) ku soo daaya waddada dadweynaha isagoo aan ilaaliye ka hayn;

x) Dhiga, ku tuura ama si mas'uuliyad-darro ah ugu tuura qalab ama alaabo dhib ku ah waddo-maridda gaadiidka , xilna aan iska saarin in uu walxaha qalabka waddada uu dhigay ka qaado;

k) Dhiga wax xanibaya tuubooyika biyaha gudbiya ee waddada ku rakiban;

d- Xanniba qulqulka biyaha ka tagaya waddada ee ku shubmaya dhulka ku dheggan waddada;

r. Xanniba qulqulka biyaha ilaa heer biyaha waddada fariistaan:

- Wuxuu gelayaa dembi, uu ku mutaysanayo ciqaab ganaaax oo aan ka yarayn "US$1,000" (Kun doolar) ama Shilling Soomaali u dhigma, wxaaana loogu dari karaa ganaaxaas in uu u celiyo Hay'adda wixii kharash ah oo kaga baxay wareejinta ma qaadista xannibaadda.

## Qodobka 42aad
## Dembiyada Lidka ku ah Madaxda Hay'adda

Qof kasta oo:

b) Aan amar u haysan, shaqaale aan ahayn, wakiil Hay'ad ka socda ahayn, ama aan haysan cudur-daar, oo isagoo gaari wata ku yimaado, kaasoo saacadaha habeenkii lagu arko dhisme kamid ah dhismeyaasha Hay'adda:

t) Lagu arko isagoo ku dhex jira dhisme ama gaari Hay'adda leedahay oo:

   i. Diida in uu muujiyo aqoonsigiisa ama uu sheego magiciisa ama meesha laga helo marka qof shaqaalaha Hay'adda ka tirsan ama sarkaal boolis uu istaajiyo;
   ii. Ku jira xaalad sarkhaan ah ama u dhaqma si gacan-ka-hadal ku jiro;
   iii. Ku kaca fal ama sameeya fal kasta oo dhaawac u geysan kara qof kale oo ku sugan dhismaha ama gaariga;
   iv. Ku kaca qeylo, af-lagaado ama akhlaaq-xumo baahsan;
   v. Si cudur-daar la'aan ah u jabiya jihaynta uu siiyo qof ka tirsan shaqaalaha Hay'adda; ama
   vi. Si sharci-darro ah u iibiya, ama u xaraasha badeeco, qalab ama alaab, haddii aan oggolaansho cad laga haysan Maareyaha Guud ee Hay'adda;

j) Ku qora, ku sawira erayo af-xumo ah ama akhlaaq-xumo ah dhismayaasha ama gaadiidka Hay'adda;

x) Fool-xumeeya qoraalada ogeysiiska ee lagu dhejiyo dhismayaasha, gaadiidka ama qalabka Hay'adda;

k) Waxyeelleeya ama faro-gelin ku sameeya hanti ay Hay'addu leedahay, iyadoo aysan jirin cudur-daar sharci;

d- Sameeya fal xannibaya ama ay dhici karto in uu xannibo socodka xorta ah ee baabuurta isticmasha waddooyinka ama meelaha la dhigto ama xarumaha la xiriira isagoo aan haysan cudur-daar sharci ah; ama

r. Isagoo ah darawal gaari oo iska indha-tira amarada sharciga marka uu shaqada ka hayo dhismayaasha Hay'adda;

- Wuxuu gelayaa dembi, uu ku mutaysanayo xabsi aan ka badnayn 1 (hal) sanno ama ganaax aan ka badnayn, "US$100-1000" (boqol ilaa kun dolar) ama lacag Shillin Soomaali u dhiganta ama labadaba.

## Qodobka 43aad
## Qodob Ciqaabeed

Qof kasta oo gala fal-dembeed ku xusan Xeerkan kaasoo aan ciqaabtiisa la qeexin Xeerkan, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka yarayn "US$100-1000" (boqol ilaa Kun doolar) ama lacag Shillin Soomaali u dhiganta ama xabsi aan ka badnayn 2 (labo) sano ama labadaba.

## QEYBTA LIXAAD
## LAALISTA XEERARKII HORE IYO QODOBBADA XILLIGA KALA-GUURKA

### Qodobka44aad
### Warejinta Hawlaha

Marka uu Xeerkani dhaqan-galo, dhammaan hawlaha Waaxda Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta u xisaaran waddooyinka heer Qaran waxay ku wareegayaan Hay'adda.

### Qodobka 45aad
### Wareejinta Xuquuqda & Awoodaha

Dhammaan xuquuqda, awoodaha, mas'uuliyadaha iyo waajibaadka ku xusan Xeerkan ama Xeer kale kaasoo ahaa mid dhaqan-gal ah Xeerkan ka hor ama Waaxdu ay ku dhaqanto, waxay noqonayaan kuwa lagu dhaqo ama lagu fuliyo Hay'adda, haddii aysan ka hor-imaanayn Xeerkan.

### Qodobka 46aad
### Wareejinta Hantida iyo Deymaha

Dhammaan wixii hanti iyo deyn ah oo lagu lahaa Waaxda ka hor dhaqan-galka Xeerkan waxay ku wareegayaan Hay'adda.

### Qoodbka 47aad
### Wareejinta Shaqaalaha

Dhammaan shaqaalaha iyo saraakiisha Waaxda waxay noqonayaan saraakiil iyo shaqaale Hay'addu leedahay markuu Xeerkani dhaqan-galo.

### Qodobka 48aad
### Tilmaamaha iyo Amarada Soo Baxay Ka Hor Dhaqan-galka Xeerka

Marka uu dhaqan-galo Xeerkan, dhammaan tilmaamaha sharci, amarada, Xeer-nidaamiyeyaasha, rukhsadaha iyo wixii kale oo ay daabacday, soo saartay ama bixisay Waaxdu ee la xiriira waddoyinka heer Qaran, ama Xeer-nidaamin ah, waxaa laga soo qaadayaa sidii in ay Hay'addu bixisay ama soo saartay oo kale.

### Qodobka 49aad
### Tallaabooyinkii La Qaaday Ka Hor Dhaqan-galka Xeerka

Hawl kasta oo sharci ah ama la sameeyey ama laga soo qaaday in la sameeyey, laga soo qaaday in aan la sameyn ee magaca Waaxda ku baxay, loona sameeyey si niyad-wanaag ah, amarkeedana la haystay, waxaa laga soo qaadayaa in ay tahay hawl ay Hay'addu sameysay ama diiday.

**Qodobka 50aad**
**Xeer-nidaamiyeyaal (Regulations)**

1. Wasiirka wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-gelinayo Xeerkan iyadoo lagu soo daabacayo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna dejinayaa arrimaha soo socda:
   b) In uu Xeerkani amrayo in Xeer-nidaamiyeyaal loo sameeyo; ama
   t) In uu ku qanco Wasiirka Xeer-nidaamiyeyaal in loo sameeyo ay habboon tahay si loo fuliyo qodobbada Xeerkan.

2. Wasiirka wuxuu soo saari karaa hab-raacyo, ama Xeer-nidaamiyeyaal uu ku soo daabacayo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda oo ku saabsan:
   b) Maareynta iyo xakamaynta dhulka loo qoondeeyey waddooyinka;
   t) Ku-meeleynta adeegyada dadweynaha ee dhulka loo qoondeeyey waddooyinka;
   j) Horumarinta badbaaadada/nabadgelyada waddooyinka dadweynaha;
   x) ka-hortagga xannibaadda waddooyinka;
   k) Meelaynta iyo dayactirka agabka waddooyinka;
   d- Meelaynta xayeysiiska iyo boorarka laga taagayo waddooyinka dadweynaha;
   r. Mamnuucista hawlaha ay dhici karto inay waxyeello u geystaan waddooyinka dadweynaha;
   s. Qorista ama soo-saarista hababka, rukhsadaha, shahaadooyinka ama oggolaanshaha ee Xeerkani amrayo in la helo;
   sh) Qaadista ujrooyinka (khidmada);
   dh) Ilaalinta degaanka xilliyada dhismaha iyo dayactirka waddoooyinka;
   c) Habka ay waddooyinka u isticmaalayaan wixii aan ka ahayn baabuurta;
   q) Duruufaha iyo habka loo xirayo waddooyinka dadweynaha;
   k- Xakamaynta, isticmaalka, maareynta, sahminta, dhisidda iyo dayactirka waddooyinka dadweynaha iyo buundooyinka;
   l) Arrimaha la xiriira habka maamulka ee lagu fulinayo Xeerkan; iyo arrin kasta oo lagama-maarmaan u ah fulinta Xeerkan.

**Qodobka 51aad**
**Baabi'in**

Xeerarkani wxuu baabi'nayaa Xeer kasta oo ka hor-imaya Xeerkan ama aan la socon karin.

**Qodobka 52aad**
**Dhaqan-gal**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelyaa mar uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo-saaro Fafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**LIFAAQ**

Dhammaan waddooyinka ku yaal JFS waxaa loo kala saarayaa sida soo socota:

**Kala-saarista Waddooyinka (A. 17)**

| **Abla-ablayn** | **Sharraxaad** | **Cidda Mas'uulka ka ah** |
|---|---|---|
| Waddooyinka Waaweyn | Waddooyinka isku xira maagaalooyinka waaweyn ah ee ku yaalla Dawlad-goboleedyo kala duwan iyo xuduudaha ka baxsan Soomaaliya | Hay'adda Qaran ee Waddooyinka Waaweyn |
| Waddooyinka Heerka Labadaad | Waddooyinka isku xira magaalooyinka Dawlad-goboleedka ee heer gobol sida waddooyinka magaalooyinka. | Hay'adda Qaran ee Waddooyinka Waaweyn |
| Waddooyinka isku-xira Magaalooyinka dhexdooda | Waddooyinka isku xira degmooyinka muhiimka ah iyo magaalooyinkooda | Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka |
| Waddooyinka isku-xira tuulooyinka ama magaalooyinka yaryar | Waddooyinka isku xira magaalooyinka yaryar sida waddada tagta suuq fog ama waddo kale | Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka |